# Magac u yaal (personlige pronomen)

I somali skiller man mellom 1, 2. Og 3. person i entall og flertall. I 1. person flertall skilles det mellom inkluderende form (innaga = vi og du/dere) og ekskluderende form (annaga = vi uten deg/dere).

I tillegg kan personlige pronomen forekomme i full form eller i en annen form der de brukes som endelse av andre små ord i setninger. Bortsett fra 3. Person entall er alle personlige pronomener maskulinum. 3. person entall bøyes personlig pronomen i henhold til personens kjønn.




Illustrasjon: Viktoria/ AdobeStock

Magac u yaal waa eray jagada ama booska magaca ee weedha geli kara. Hadalkana wuu qurxiyaa soona gaabiyaa. Waxa uuna ka qabtaa weedha dhexdeeda shaqadii magaca.

Tusaale

Xasan wuu yimid, wuxuuna keenay ubadkii iskuulka ku maqnaa. Isaga iyo iyaguba waa daallan yihiin.

Magac u yaalku shaqada magaca ee weedha ka hayo ka sakow waxa uu reebaa ku celceliska magacyada ee hadalka..

Magac u yaalllada waxa ka mid ah:

Magac u yaal dad oo loo adeegsan karo qof kasta oo hadlaya, lala hadlayo ama laga hadlayo.

Magac u yaal lahaansho.

Magac u yaal waydiineed.

Magac u yaalada dadka waxa loo qaybin karaa kuwa dhan ama ebyoon iyo kuwo dhiman.

**Magac u yaallo ebyoon**

Ani + ga

Adi- ga

Isa-ga

Iya- da

Anna-ga

Inna-ga

Idin-ka

Iya -ga

Waxa dhamaan magac u yaallada ebyoon raaca qodobka labka markay keli iyo wadar yihiinba, marka laga reebo qofka seddexaad ee keliga ah , kaasi isla beddela hadba qofka laga hadlayaa jinsiga uu yahay. Isaga waa lab oo sidaa darteed waxa uu wata qodobka labka, iyo iyada oo wata qodobka dhedigga.

Waxa kale oo la kale soocaa annaga iyo innaaga , ta hore qofka hadlayaa waxa iska reebayaa qofka uu la hadlayo, ta dambana waxa uu ku darayaa qofka uu la hadlayo.

**Magac u yaallada dhiman**

Aan – qofka 1 aad ee kali ah.

Aad – qofka 2 aad ee keli ah.

Uu –qofka 3 aad ee keli oo lab ah.

Ay –qofka 3 aad ee keli oo dheddig ah.

Aannu –qofka 1 aad ee wadar ah oo qofka lala hadlayaa aanu ku jirin.

Aynu – qofka 1 aad ee wadar ah oo qofka lala hadlayaa ku jiro.

Aad – qofka 2 aad ee wadar ah.

Ay – qofka 3 aad ee wadar ah.

**Magac u yaalada lahaanshaha**:

Kayga /yayda

Kaaga/taada

Kiisa/tiisa

Keeda/teeda

Kaayaga/taayada

Keennna/teenna

Kiinna/tiinna

Kooda/Tooda

Erayadani waxa inya badan gadaal ka raacaan magacyada iyagoo tafatir dheeraad ka bixinaya magaca ay la socdaan. Tusaale Qalin-kayga sii qaado, markaad iskuulka tegeysid. Waxaase ay tafatiriyaashaana ku jiri karaan weedho iyagoo kali ah, markaas ayaana loo tixgelin kaaraa magac u yaallo. Magac u yaallada sida kor ka muuqata waxay noqdaan lab iyo dheddigba.

Tusaale

Gabdhaha dugsiga dhigsta tiisa ayaa ugu da' yar.

Baabuurta meesha taalla kooda ayaa ugu qurux badan.

**Layli**

Ku buuxi meelaha bannan macag u yaallada ku habboon.

1. ......................... warqad baan qoray maanta.
2. ......................... gaadhi bay raaceen.
3. ........................ iskuulkii ayay tageen.
4. .......................... casharkii waad akhriday.
5. .......................... waannu dabaallanay shalay.